"Markii aan ku jiray fasalka 9 aad, waxaan bilaabay in aan iskuulka in badan ka maqnaado. Iskuulka waa aan jeclaa mar walba laakiin hooyaday ayaa dhib badani haystay oo u baahnayn caawimaadayda. Shaqaalaha SAM waxa ay awood u helaan in ay ka caawiyaan hooyaday dhibkii haystay si aan kolkaa iskuulkayga u dhigto oo aanan uga wal walin iyada. Hada, sannadka soo socda ayaan qalin jabin waxaana u socdaa Jaamacad!"

*- Arday dhigta fsaalka 11th aad*

"Runtii waxaan dareemay in SAM uu aad ii caawiyey. Caawimaada aan ka helay ee dejinta borogaraamyadu waa ay wacanyd."

*- Waalid arday dhigta of 11th aad*



"SAM waxa na siiyaa kaalmada iyo khayraadka siyaaadada ah aan u baahanay si aan u caawino ardayda iyo qoysaska. Ardayda inta badan loo gudbiyo SAM wax bay ka bedelaan imaanshahooda waxa ayna ku najaxaan tacliintooda iskuulka."

*- Xubin shaqaalaha ka tirsan*



Wax barashada waxa ay furtaa albaabka shaqooyinka lacagta fiican bixiya, waxay kaloo wadada u xaartaa helida ardaygu uu helo shaqo fiican. Maadaama aysan shahaado dugsi sare haysan qaar badan oo ka mid ah dadka degaanka dhib ayaa ka haysta in ay shaqo helaan oo is dabaraan, nasiib darro, dadkaasi waxa ay in badan la kulmaan dhib badan iyo cadaaalad la'aan

Waa ku mahadsan yihiin waalidiiinta iyo shaqaalahuba, shaqeynta ay nagala shaqeeyaan in la hubiyo in ardaydu ay wax bartaan si kolkaa ay iskuulka uga baxaan iyagoo leh xirfadaha ay u baahan yihiin si ay hor u kac u gaaraan.

John J. Choi
Xeer Ilaaliyaha Ramsey County

Wixii akhbaar iyo khayraadka ah ee lagu hagaajinayo imaanshaha:


**Xafiiska Xeer Ilaaliya Ramsey County**
345 Wabasha Street N., Suite 120
St. Paul, Minnesota 55102
Phone 651/266-3222
www.ramseycounty.us/countyattorney


# RAMSEY COUNTY


# IMAANSHAHA ISKUULKU WAA MUHIIM (SAM)

*Maalin walba. Fasal walba.*

**Xafiiska Xeer ilaaliyaha Ramsey County**

**JOHN J. CHOI**
Xeer Ilaaliyaha Degmada






# IMAANSHAHA ISKUULKU WAA MUHIIM (SAM)

Ardayda mar mar badan gafta iskuulku waa ka haraan ardayda kale. Waxaan la shaqeynaa ardayda qoysaska, hay'adaha sharci ilaalinta iyo kuwa beesha iyo shaqaalaha hay'ada Ilaalinta ilmaha.

Hadafkayagu waa in aan fahamsno sababaha ilmahu iskuulka ugu maqnaanayaan aana kala shaqeyno ilmaha iyo qoysaskooda ka qaadida wixii carqalad ah oo hor taala si kokaa ay maalin walba ay u yimaadaanununa guuleystaan iskuulka iyo tacliintoodaba .

## Waxa la sameeyo

- Xeer ilaaliye ka socda Degmada ayaa la kulma waalidiinta (iyo ilmaha 12 jirka ah ama ka weyn) tsi ay u falanqeeyaan faa'iidada weyn ee ay tacliintu leedahay iyo in ay ku wacyi geliyaan waaldiinta sharciga khasabka ka dhigaya tacliinta ilmaha iyo talaabooyinka la qaado si shar-cigaa loo fuliyo.

**Akhbaar Wacan!**

**Ardaydu 79% waa ay hagaajiyaan imaanshahooda talaabadan ka bacdi!**

- Hadii aysan wax ka bedelin imaanshooda; Waalidka (iyo ilmaha 12 jir ah ama ka weyn) waxaa la siin fursad kale oo ay uga qayb galaan kulan koloo la yiraa Kulanka Kooxda Dib u Eegida Imaanshaha Ardayga (SART), kolkaa oo la gaaro heshiis si wax looga qabto sababaha imaasho la'aanta ardayga keenaya.

- Hadii wali imaansho la'aantii aan wax laga qaban, Xeer Ilaaliyaha Degmadu waxa uu arinta hor geyn karaa maxkamad.Hadii ilmahu uu ka yar yahay 12, talaabo sharci ah ayaa laga qaadi waalidka ilmahaa. Hadii ilmahu uu 12 jir yahay ama u ka weyn yahay talaabo sharci ah ayaa lagaqaadi waalidka ardayga ama labadaba

## Qof Walbaa Door Buu Leeyahay

<u>Ardaygda</u>:
Tacliintu waa furaha mustaqbalkaaga. Shaqadaadu waa inaa diskuulka joogto – saacad walba iyo maalin walba.

<u>Waalidiinta</u>:
Waalidiinta ayaa sharciyan mas'uul ka ah inay hubiyaan in ilmahoodu maalin walba iskuulka tagaan. Ilmaha lama ogola in ay sabab la'aan iskulka uga maqnaadaan.

<u>Iskuulka</u>:
- Sii ardayga mashaariic wax barasho oo ka soo baxa baahida wax barasho ee ardayga
- Wax ka qabo wixii careqalad ku ah imaanshaha iskuulka iyo tacliinta ardayga
- Ka reeb qoraal sugan imaasha la'aanta ardayga ee iskuulka iyo wixii aad ku wada hadashaan waalidka ee ku saabsan arintaa.

**Ma og tahay?** Minnesota, Ilmo kasta oo da'diisu u dhaxeeyso 7 ilaa17 waa khasab in uu iskuul dhigto. Waa sharci taasi.

**Sababaha lagu maqnaan karo:**
- Xanuun
- Balan dhaqtar
- Maalmaha ciidaha ah
- Arin culus oo korodha

## Cawaaqibyada imaan kara hadii aan sharciga loo hogaansamin

*Ilmaha 12 sanno ka yar*, waalidkood waxaa looga yeeri karaa maxkamad iyadoo lagu eedeynayo dayac dhanka tacliin ah waxaana lagu amri karaa:
- In ay la shaqeeyaan hay'ada ilaalinta ilmaha
- Inay ka qayb galaan fasalada waaldinimada, kulano la talin ah, ama adeegyada kale ah ee lagu hagaajinayo iskuul ilmaanshaha ilmahooda
- Bixin ganaax

*Ilmaha da'doodu u dhaxeyso12-17*, waalidka iyo/ama ayaa maxkamad looga yeeri karaa iskuul dhigasho la'aan awgeed waxaana lagu amri karaa: In ilmaha ay kor meerto hay'ada Ramsey County Human Services
- Ka qayb mashaariicda iyo adeegyada loo arko in ay ku haboon yihiin xaalada gaarka ah ee ardaygaa.
- In aan loo diido gaari wadid ilaa uu ka gaaro 18
- Bixin ganaax

Mar marka qaarkood ee ay xaalad adagi jirto, ilmaha guriga waalidkii waa laga kaxaysan karaa oo waxaa loo geyn karaa qoys kale, ama waxaa la geyn karaa xarun ama goob ilmo koox ahi joogaan.